Hagardaamooyinka Jabuuti ku Hayso Ummaada Soomaaliyeed

Sida la wadda ogyahay dowladda Jabuuti, waxay faraha kula jirtay arrimaha Soomaaliya muddo dheer (1986-2009) iyada oo sheegta in ujeedka ay Soomaaliya ka leedahay uu yahay in ay walaalahooda Soomaaliyeed ay nabad, dib-u-heshiisiin iyo horumar ay helaan.

Haddaba dhawaan ayaa aqoonyahanno iyo waxgarad Soomaaliyeed oo daraasad dheer ku sameeyay ujeedooyinka Jabuuti, waxay soo bandhigeen in Jabuuti ay tahay wadanka ugu daran ee hagardaameeya Soomaaliya.

Tusaale, **1987-1990**: Jabuuti iyadoo sheegta in ay xiriir wanaagsan la leedahay ummadda Soomaaliyeed iyo dowalddii markaa jirtay, ayeey haddana iska horkeenaysey dowladdi iyo shacabkii Soomaaliyeed. Sida ay xaqiijinayaan saraakiil ka kala tirsanayd ururradii mucaaradka ahaa, Ciidamadii Dowladda iyo siyaasiyiin (diplomats'), Sannadkii 1987, Jabuuti waxay dalkeeda ka masaafurisey laba goor (2) shacab Soomaaliyeed oo ay islahayd waxay daacad u yihiin ururkii SNM, waxayna u gacan-galisey ciidammadii dowladdii Soomaaliyeed si loo laayo. Sidaas oo kale, sanadihii 1988-1989, waxaa iyana magaalada Jabuuti laga raafay saddex goor (3) dad reer koonfureed ahaa waxaana la geeyay meello uu gacanta ku hayeey ururkii SNM. Nasiib-wanaag lama sheegin wax dad ah oo la laayeey.

1991: Markii Dowladdii Soomaaliyeed burburtay, Jabuuti waxay gudaha u soo gashay xuduudda Soomaaliya, waxana Calankeeda ka taagtay meello ay mid

ahayd tuulada Ceel-gaal,[1] oo ka tirsanayd gobolkii Wuqooyi Galbeed. Dagaallo dhexmaray Soomaalida iyo Jabuuti kadib waxaa isbedellay qorshihii Jabuuti.

Bishii March 1991, Jabuuti waxay qabatay shirkii ugu horreeyay ee "dib-u-heshiisiin" lugu sheego. Marka shirka la qabanayeey waxaa Soomaaliya ku dagaalamayeey ururradii hubaysnaa ee mucaaradka ku ahaa Dowladdii Soomaaliyeed sida SNM, USC, iyo SPM oo dhinac ah iyo maamulkii dowladdii hore oo wali ka talinayeey gobollada Jubooyinka iyo Galguduud oo dhinac ah. Si kastaba ha ahaatee, wadanka badankiisu wuxuu gacanta u galay saddexdii urur (USC, SNM iyo SPM), oo sida la sheego horay ugu soo heshiiyay magaalada Baxardaar ee dalka Itoobiya in marka xukunka laga wareejiyo maamumlkii hore ay Soomaalida oo dhan isugu yeeri doonaan hoggaan cusubna la dooran doono. Waxaa kaloo jiray in qaar ka mid ah xarumihii iyo xeryihii milateriga ee ay ku jireen kaydadkii hubka ay wali xafidnaayeen.
Waxa kaliya ee markaas loo baahnaa waxay ahayd in shirka Soomaali loogu wada yeero shirka, luguna qanciyo sidii dowlad loo dhanyahay loo dhisi lahaa. Nasiib-darro, ururadii hubaysna iyo dowladdii horeba shirkii Jabuuti waa loo diiday, waxayna lugu dhisay dowlad ay madax ka yihiin rag aan lugu arki jirin fagaarayaasha siyaasadda. Waxaa kaloo shirkii ka soo baxay go'aanno ay ka mid ahayeen in ciidamada qalabka sidey ay hubkooda u dhiibaan jabhadihii hubaysanaa!

Arrinta ah in Ciidammadu Hubkooda ay u dhiibaan jabhadihii waxay muujinaysaa saddax arrimood oo layaab leh: mida hore, waa la yab in amar la siiyo raggii shirka loo diiday (ururadii hubaysnaa (SNM, USC, SPM) iyo dowladdii). Waa midda labaade, waa la yaab in rag sheegaya in ay dowladnimo doonayaan ay dhahaan

[1] Ceel-gaal waa tuullo ku taal xeebta u dhexaysa Berbera iyo Lug-haya, oo uu ku yaal ceel-shidaal oo horay loo dhameeyay baaritaankiisii haddana u baahan in la dhoofiyo shidaalkiisa. Dadka qaar ayaa sheega in Tuulada Ceel-gaal, uu ku dhashay (AUN) madaxweynihii hore ee Jabuuti, Xasan Gulleed Abtidoon.

“ciidamada Dowladdu hubka ha ku wareejiyeen mucaaradka”, taas bedelkeeda waxaa ka macquulsanayd in ay dhahaan hubka dowladda cusub (iyaga) halugu wareejiyo. Waa midda saddexaade, caqliga nama siinayo in lugu yiraahdo raggii dirirayeey nimba ninka kale hubka ha u dhiibo! Si kastaba ha ahaatee, waxaa sidaas ku bilowday dagaalka ilaa maanta socda. Waxaa kaloo arrintaasi keentay in lugu dhawaaqo Jamhuuriyadda SOMALILAND. Waxaa kaloo la xaqijinyaa in Jabuuti ay xadkeedii xiratay markii dagaalkii ay sababtiisa lahayd uu sidaas ku bilowday, dhanka kalena ay ciidamada Jabuuti gudaha u soo galleen xadka Soomaaliya, calankeedana ay ka taagto.

1999-2001: Shirkii Carta, waxaa la qabtay sideed sanno oo uu socday daggaalkii ay Jabuuti qorshihiisa qaybta weyn ku lahayd, iyo lix shir oo kale oo aan guul lugu gaarin oo soomaalida loo qabtay. Fikraddii shirka Carta, waxaa lahaa siyaasiyiin iyo waxgarad Soomaaliyeed oo garowsadey in Soomaalidu u baahantahay shir dib-u-heshiisiin ah. Waxaa ka mid ahaa Ra’iisu wasaarihi hore ee Soomaaliya ahaana markii danbe Madaxweynihii hore ee Jamhuuriyadda Somaliland, (AUN) Max’ed X. Ibaraahin Cigaal. Qorshihii shirkaas markii hore loogu talagalay wuxuu ahaa in shirka lugu qabto meel Soomaaliya ah ama dal aan xaasaasiyad u lahayd arrimaha Soomaaliya. Waxaase dhacday in ay Jabuuti u gacan-haadisey[2] qaar ka mid ah siyaasiyiintii ayna sidaas majaraha ugu qabatay shirkii.

Intii gogol-xaarkii shirka lugu jiray ayaa waxaa soo baxday in Jabuuti ay wadato qorshe gaar u ah, kaas oo ay beello iyo shaqsiyaad gaar ah ugu xaglinaysay. maamullo iyo beello Soomaaliyeed oo awood iyo tixgalin weynba ku leh wadankana aan la siinayn wax tixgalin ah. Madaxweynihii Somaliland, X. Max’ed Ibraahin Cigaal iyo Madaxweynihii hore ee Puntland, Cabdullaahi Yuusuf Axmed,

[2]

ayaa ka mid ahaa madaxdii ku adkaysatay in aysan shirkaas ka qayb galayn sababo la xariiray sida ay Jabuuti wax ku wadey oo ula muuqday in aysan Soomaalida dan u ahayn.

Wixii markaana loo baahnaana waxay ahayd in Soomaalida loo wadda yeero arrimahoodana loo daayo iyagoo aan la-kala-faquuqayn. Nasiib-darro, shirkii waxaa ka soo baxay dhibaatooyin hor leh oo ay ka mid yihiin: halbeegga "4.5" Tusaale, halbeegga "4.5" oo loola jeedo afarta beellood ee waa weyn iyo beesha barka ah, wuxuu ka horimanayaa caqliga Bani-aadamka, Diinta Islaamka iyo dhammaan nidaamyada ka jira caalamka. Midda labaad, wuxuu khilaafsanyahay waxyaabihii aasaasiga u ahaa jiritaanka ummadda Soomaaliyeed, ee ay ugu mihiimsanayd in Soomaalidu aysan ku kala sarayn hayb.

Haddii aynu dhinac kale ka eegno halbeega ma'ahan 4.5 ee waa 2.5, sababtu waxay tahay, laba beellood ayaa miileysta labada xil ee wadanka ugu sareeya (Madaxweynaha iyo Ra'iisu wasaaraha) hal beelna waxaa sidii **dhaxal** oo kale loo siiyeey guddoomiyaha baarlamaanka, ummadda intii kalena xuquuqdii iyo tixgalintii ay lahayd waxay noqoday "baqtinasiib".

Shirkii Carta, go'aannadiisii waxaa ka mid ahaa in aan xil sare loo dhiibin wax loogu yeeray "dadkii dalka denbiga ka galay, kuwa shirka Carta diiday iyo kuwa hubaysan" waxayna arrintaasi keentay in dowladdii Carta ay ka shaqayn wayday mucaardkii ay abuuratay intii ay Jabuuti joogtay oo ay ugu xoog badnaayeen hoggaamiye-kooxeedyadii. Si kastaba arrintu ha ahaatee Dowladdii Carta lugu soo dhisay xal uma aysan arkayn in ay xoog isticmaasho.

2008-2009: Sida ay waxgaradka Soomaaliyeed qabaan, Jabuuti waxaa ka dhacay shir shirarkii hore la mid ah {shir-qool} shirkaas wuxuu ahaa shir

dowladna lugu burburiyeey (Dowladdii Empagati) dowladna aan lugu dhisin. Waxaa lugu bedelay Madaxweynihii hore, Ra'iisu wasaarihii, Baarlanamkii oo laga dhigay 550 ayna isku koobeen intii Jabuuti joogtay iyo magacii dowladda oo ahaa "Dowladda Federalka ku-Meel-Gaarka" oo loo bedelay "Dowladda-Midnimo-Qaran. Waxay kaloo Jabuuti iyo intii joogtaba ay raali ka noqotay in la qabsado Xaruntii Dowladda oo markaas ahayd Baydhaba.

Intii shirka uu socday Jabuuti waxay diiday baaqyo iyo talooyin ku saabsanaa in shirka laga qayb-galiyo maamullo, beello iyo ururro awood muuqata ku lahaa wadanka. Waxaa kaloo baaqyada ka mid ahaa in dowladaas cadowga looga dhigay shacabkeedii aan lugu deg-degin in Muqdisho la geeyo, masa dhicin. Dowladdu markii ay Muqdisho tagtay waxay ka gaabisay in ay ummadda u soo bandhigto qorshe dib-u-heshiin iyo in ay maamusho gobollada dalka. Arrinti siday doonto ha ahaatee, dowladdu waxba kama qaban amaankii oo gobollada koonfurta waxaa la wareegay Al-shabab, dhaqalihii, xaafiiskii socdaalka, baddii (magartion office) waxaa si cad ugu wareejisay shirkaddo iyo dowladdo shisheeye halka meelaha kooban ee ay Muqdisho ka joogtana ay Amisom ku difaacdo.

Khilaafka Xuduudaha: Warbixin ay dhawaan soo sartay SOMALITALK, ayaa waxaa lugu arkay raad muujinaya in Jabuuti ay sheegatay dhul-baddeed Soomaliyeed oo ku beegan degmada Saylac ee gobolkii hore ee Awdal. Dabagal la sameeyay ayaa xaqiijiyeey in Dowladda Jabuuti ay leedahay hami fog oo ku saabsan dhul weyn oo isugu jira bad iyo beri oo ah dhul-xeebeedka u dhexeeya Lug-haya ilaa iyo Bullo-Xaar oo qiyaas ahaan 35 km ka xigta dhanka galbeed degmada Berbera. Waxaa kaloo jira warar sheegaya in Heshiiskii dhul-badeedka ee ay kala saxiixdeen Kenya iyo Dowladda Midnimo Qaran, uu dhabaha u xaarayeey dhowr qorshe oo kan Jabuuti ka midyahay.

Dhaqaalaha: tan iyo shirkii Carta, Jabuuti, waxay isku dayeeysay sidii ay mar gacanta ugu dhigi lahayd dhaqaalaha Soomaaliya. Waxayna la wareegtay howllo ay qaban lahayd dowlad Soomaaliyeed. Jabuuti waxaa ku yaal **rug ganacsi** Soomaaliyeed, oo leh "LC" (Licence for commerce). Rugtaan ganacsigu ee Jabuuti la wareegtay waxay keentay in dhaqaalihii Soomaaliya uu hoos u dhaco, dekedihii Berbera iyo Boosaaso-na ay qarka u saaranihiin in ay xirmaan, kadib markii adeegyadii ay qaban jireen ay u wareegeen Jabuuti.

Dhaqaalaha xumaaday ee Somaliland iyo Puntland, wuxuu kaloo keenay in adeegyadii bulshadu u baahnayd oo dhani ay hoos u dhacaan sida caafimadkii, waxbarashadii, nabadgalyadii shaqooyinkii iwm. Waxay kaloo keentay in ay boqollaal dhalinyaro ah oo ka cararraya shaqo la'aan iyo faqri ay badaha adduunka si joogto ah ugu dhintaan. Si kastaba arrintu ha ahaatee waxaa jira wal-walka laga qabo in Jabuuti ay colaaddo ka abuurto gudaha maamullada Somaliland iyo Puntland, kuwaas oo ah meelaha kaliya ee ummadda Soomaaliyeed ay nabad ku haystaan.

Xilligii Dowladdii Soomaaliyeed, Jabuuti waxaa ku yiilay bank iyo Shirkaddii Camiska Qaranka. Isla markii dowladdii dhexe ay dhacday, Jabuuti waxay amar ku bixisay in lacagtii tiilay bankigii iyo laantii Caymiska aan lala bixi Karin. Ilaa hadda lama oga meel ay Hantidaasi ku denbaysay.

Dhaqanka iyo taariikhda: Waxaa Jabuuti laga furay xarunta *qalinlayda* iyo *halabuurka* Soomaalityeed (Somali-Pen), waxaana nasiib-darro ah in dhawaan goobaha buuggaagta caalamka (libraries) lugu arkay buug xaruntaasi qortay (Innaga iyo Xabashi) oo ay ka buuxaan taariikho qaloocan iyo waxyaabo dhibaatooyin ku ah ummadda Soomaaliyeed.

Jabuuti waxaa kaloo ku yaal laba saldhig milatery oo ay leeyihiin Mareykan iyo Faransiis, kuwaas oo dhowr goor looga duulay dalka Soomaaliya. Dhawaan ayaa (2 goor) Ciidamo Faransiis ah oo Jabuuti ka duulay ay laayeen dhalinyaro lugu eedeeyay in ay ahayeen burcad-badeed. Sidaas oo kale, ayaa shacab iyo xoolo lugu xasuuqay miga gobolka Jubada hoose ee Soomaaliya. Haddana waxay Jabuuti wadaa dhibaatooyin kuwii hore ka daran.

Waxgarad badan ayaa rumaysan in Jabuuti ay gacan-yare u tahay wadammo danno kala duwan ka leh Soomaaliya, kuwaas oo ay ka midyihiin shisheeye oo danno kala duwan ka leh Soomaaliya. Waxaase uga mihiimsan danta ay iyadu ka leedahay Soomaaliya. Waxay kaloo waxgaradku rumaysanyihiin in Jabuuti ay tahay **shaybaar** (laboratory) lugu bacrimiyo nuxurka Soomaalida (diinta, hidaha iyo dhaqanka iyo aragtida wadaniga ah). Marka shaybaarka lugu ogaado tayada nuxurka Soomaalida ayaa isla shaybaarka lugu sameeyaa dawadii dili lahayd nuxurka. Ujeedka Shaybaarka loo sameeyayna waxay tahay in uu soo saarro waxa loo yaqaan "***failure***" oo micneheedu yahay **guul-darro** (*saaqid*).

Marka lugooyda meel la iska dhigo waxaan jirin wax la taaban karo oo Jabuuti walallahooda Somaaliyeed ay u qabatay muddodii dheerayd ee ay sheegaysay in ay ka xuntahay dhibaatada haysata Soomaaliyeed.

Jabuuti oo ah wadan yar oo qarannimadiisa ay sabab u ahayd ummadda Soomaaliyeed, dadkiisuna ay u qaybsanyihiin laba qolo (Canfar iyo Soomaali uu ka dheexyo xiliftan ku salaysan isir iyo dhaqan), xiriir fiicanna aan la lahayn wadamada dariska la ah, ayaa wuxuu u muuqdaa mid mustaqbalkii ka doortay hawo xaqiiqda ka fog. Waxaa xasuus mudan in waxgaradka Soomaaliyeed aysan eed iyo xumaan midna u hayn shacabka reer Jabuuti, laakiin maamulka Jabuuti,

uu yahay mid xumayn doono xiriirka u dhexeeya labada shacab ee walaalaha ah, haddii uusan beddellin siyaasaddiisa ku wajahan Soomaaliya.

Haddaba, maxaa Soomaalida la gudboon haddii kuwii cid ugu xigay “Jabuuti” ay sidaas u silcinayaan?

Waxaa la gudboon:

1. In ay garowsato in xalka uu Soomaalida ku dhex-jiro, si loo gaarrana loo baahanyahay in qof, urur, beel, iyo maamul kasta uu tanasullo isla markaana la is wada aqoonsato. Tusaale, dhulka Jabuuti ay doonayso waa dhulka Soomaaliyeed oo ay maamusho Somaliland, oo gooni-isu-taageeda ku dhawaaqday sannadkii 1991walina aan aqoonsi helin. Jabuutina waxay ka faa’iidaysanyasaa khilaafka u dhexeeya Soomaalida iyo gooni-isu-taagga Somaliland. Sidaas daraateed, haddii soomaalidu ay kala goyso iyo haddii ay midowgii ku joogayso, bal marka hore ha laga wadda shaqeeyo in dhulku uusan Soomaalida wadadhaafin. Waxaa kaloo fiican in meel la iska dhigo wixii lugu kala duwanyahay, lagana wada shaqeeyo wixii isku aragti laga yahay.

2. waxaa kaloo soo jeedinaynaa in Soomaalidu ka fikirto sidii shir nabadayn ah loogu qaban lahaa soomaaliya dhexdeeda kaas oo ka madax-bannaan faragalin shisheeye. Waxaana Ilahay mahadi ah in uu jiro maanta dhul Soomaaliyeed oo nabad iyo maamulba leh, sida Somaliland iyo Puntlnad. Waxana xasuus mudan in Somaalidu ay dhaqan u leedahay maaraynta dhibaatooyinka iyadoo aan gacan ka helayn Beesha Caalamka (international community)

3. Ugu danbayntii waxaan soo jeedinyanaa in la hello dad bulshada rayidka (civil society) oo howshaas u istaaga. Waxaan dadkaas ku dari lahayn Abwaanka Soomaaliyeed Max'ed Ibraahin Warsame (Xadraawi). Dadkaasi waa in aysan noqon kuwo xil iyo shaqo doon ah, laakiin ay noqdaan xal doon aragti ku filan u leh xalinta dhibaayooyinka Soomaaliya ka jira

4. Waxaan u soo jeedinaynaa kooxaha iyo beelaha wadammada shisheeye ka doonaya in ay xukunka Soomaaliya ay ku hayaan in ay ka waantoobaan. Taas beddelkeedana ay Soomaalida taageero ka doontaan.

Jabuuti iyo Beesha Caalamka:

Dowladda Jabuuti, waxaan ugu baaqaynaa in ay faraha kala baxdo arrimaha Soomaaliya. Sidaas oo kale, wadamada IGAD, Arab League, Mareykanka, Yurub, Qarammada Midoobay iyo Midowga Africa in aysan Soomaalida ku qasbin wax aan xal u ahayn Soomaalida iyo cid kale midna.Taas bedelkeedana ay Soomaalida isaga dhex-baxaan wixii ay ku heshiiyaana ay markaas gacan ku siiyaan.

Afeef: akhriste, ujeedka qoraalku ma'ahan in dhibaato lugu abuuro ama lugu gafo cid aan eed lahayn, laakiin waa in xal loo hello dhibaatooyinjka jira. Mahadsanid.

A. Gurato
Gurato2@hotmail.com